



MINNEAPOLIS  
PUBLIC SCHOOLS  
Urban Education. Global Citizens.

Xubinta Qoskaka sharafta leh:

Ku soo dhawaada sanad Dugsiyeedka cusub Noo Billaabanaya.

Sanadkaan, waxay dugsiyada degmadeenu isticmaalayaan barnaamij Aqriska luuqada oo cusub, Benchmark Advance. Waxaa uu daabacaa barnaamijyada waxbarasho ee ugu cusub suuqa. Waxaana uu si qaas ah u daboolayaa heerka dalabaadka waxbarasho ee maantay jirta.

Heerarkaas oo loo baahan yahay in uu ardayga ula howl-galo si adag, oo isugu jira qoraalo iyo fahan qoto dheer fasiraado macnaha qoraalka. Taas waxay noo hirgalinaysaa inay ardayda wax badan la falgalaan iyo isdhexgalka barnaamijyada casriga.

Hadaba maxuu uga duwan yahay shirkadaan Benchmark Advance kuwii hore?

Waxay uga duwan tahay Isbadalka u weyn oo xaga: **Akhriska Buuggta ah.**

Buuggta ardayda waa kuwo gundhigoodu fudud yahay oo la maareyn karo, sida wargeyska qoraaladiisa, buugtaas waxaa loo sameeyey ardayda si ay ula falgalaan aqriska iyoga oo ku qoraaya bagga oo sharaxayaana qoraalkooda.

Bal u kaadi..... Tani ma waxay ka macno tahay in uu ardaygu qori karo buuggiisa ama buuggeeda?

Haa! Maahan oo kaliya in ardayda loo ogol yahay inay ku qoraan buuggooda oo kali ah, laakiin waxaa kaloo loo ogol yahay inay ku qoraan buugga gudihisa! Maxaa yeelay sharaxaada ay sharaxayaan waxay dhiirgalinaysaa ardayga in uu hanto qoraaladiisa isagoo soo koobaya, kaas oo ka caawinaya in uu fahmo.

Halkii buugg waxaa loogu talo galay in la isticmaalo sadex todobaad. sadexdaas todobaad kadib aqriska iyo qorista fasalka waxaa uu ka shaqeynayaa qoraaladaas. Ardayda waxay guriga usii qaadayayaan buugga ay sharaxayaan qoraaladooda. Ardaygaaga sharaxaadaha uu ka bixiyey qoraaladiisa waxay ku tusayaan in aad wax ka ogaatid sida uu ula falgalay oo u sameeyey ardaygaaga waxa uu aqrinayey.

Inta uu ardaygaagu ka shaqeynayo cutubyada casharka, waxaad wax ka ogaan doontaa in aqrinta mawduuca uu yahay hal mowduuc. Mowduucyadaas waxaa ka mid ah, cilmiga bulshada, iyo sayniska oo ka kooban maadooyinka qoraalada aragtiyada ka muuqato leh. Mowduucayada shaqsiyadeed. Sadex todobaad kasta waxaa ka helidoontaa dugsiiga warqado farbarasho oo guriga lagu soo diri doono oo aad guriga ku wada sameyndoontaan adiga iyo ardaygaaga. Howlahaas oo ku xiran cutubka casharka iyo ereyada. Fahamka barashada xarfaha lagu baray casharka.

Waad ku mahadsan tihiiin waqtigiina aad ku aqriseen warqadaan. Waxaan rajeynaynaa inaan isticmaalno shirkada Benchmark Advance ardayda si ay u horumar iyo guul u sameeyan sanad dugsiyeedka!

Had iyo goor, hadii aad wax su'aal ku saabsan barnaamijka aqriska luuqada ama horumarka ardaygaaga. Fadlan haka waaban inaad ilasoo xiriirto.